# ISBADALKA LAGU SAMEEYEY BARNAAMIJKA LACAGTA DANYARTU WUXUU SUURTO GALINAYAA INAY DADKA SHARCIGA HAYSTA EE SOO HAAJIRAY HELAAN FAA'IDOOYINKIISA

**Ma ihi mu'aadin Maraykana.  Miyaan heli karaa lacagta danyarta?**

- Waxa laga yaabaa inaad **Imika** uqalantid hadii aad haysato Sharcigii Rasmiga ahaa iyo in adiga ama xaaskaagu, ama waalidkaagu hayaan wax muujinaya inay Maraykanka ka shaqayn jireen (Xafiiska Lacagta Danyartu ayaa xaqiijin kara inaad mudadii lagaa doonayey  shaqaysay). Dadkii Maraykanka qaxooti ahaan ku yimid iyo dadka kale ee soo haajiray way uqalmaan. Waxa laga yaabaa inaad uqalantid hadii aad si sharci ah ugu noolayd Maraykanka laga bilaabo Ogost 22, 1996, ***iyo*** (1) wakhtigaasina aad ahayd 65 jir (Hadii aad dhalatay Ogost 22,1931 ama ka hor), ***ama*** (2) inaad imika heshid lacagta curyaanimada, ***ama*** (3) Imika da'daadu ka hoosayso 18 jir.  Waxa kale oo laga yaabaa inaad uqalantid hadii aad joogtay Maraykanka mudada loogu mutaysto oo ah 5 sanadood.

**Waa maxay isbadalada la sameeyey?**

- Bishii May 13keedii 2002, Madaxwayne Buush wuxuu sharciyeeyey- "Qodobka Amniga Beeraha iyo Maalgelinta Miyiga oo soo baxay 2002" (Farm Security and Rural Investment Act of 2002) kaasi oo usuurto galinaya dadka aan mu'aadiniinta ahayn ee dhaqaalahoogu hooseeyo iyo dadka sida sharciga ah ugu soo haajiray Maraykanku inay helaan lacagta danyarta hadii ay buuxiyaan Barnaamijka Lacagta Danyarta shuruudihiisa.

**Goorma ayuu sharciga cusubi hirgalayaa?**

- Dadka soo haajiray ee sharciga haysta ee uu saameeyey sharcigan soo baxay 2002da waxay uqalmaan inay helaan faa'idooyinka lacagta danyarta horaanta Aktobar 1deeda, 2002, laakiin badiduudu umaqal mayaan ilaa wakhti dambe. Macluumaadka hoos ku qoran ayaa kuu sharaxaya goorta ay bilaabmayso wakhtiga aad uqalantid.

Sharciga soo baxay 2002 wuxuu u-ogol yahay inay dadka sida sharciga ah usoo haajiray ee BUUXIYANA shuruudaha  hoos ku qoran uqalmaan:

✔ Kuwa hela faa'idooyinka la'xaad la'aanta (sida Lacagta lagu kabo Dammaanada Bulshada ama la'xaad la'aanta la xidhiidha daryeelka caafimaadka) Dadkani waxay ubilaabmaysaa **Aktobar 1, 2002**);

✔ Kuwa ku noolaa Maraykanka 5 sanadood iyaga oo ku joogay sharci ay ugu qalmaan (Kuwani waxay ubilaamaysaa  **Abriil 1, 2003**); ama

✔ da'doodu ka hoosayso 18 jir soona galay Maraykanka wixii ka dambeeyey Ogost 22,1996 (Kuwani waxay ubilaamaysaa **Aktober 1, 2003**).

**Dadka soo haajiray ee uqalmaa waa kuwee?**

- Dadka soo haajiray ee uqalma waxa ka mida dadka haysta sharciga rasmiga ah (Dadka haysta Giriin Kaadhka), qaxootiga, dadka magan ahaan isdhiiba, dadka loo loogu talo galay in la mastaafuriyo ama la raro, Kuyuubaanka, Dadka Hayti ka yimid, shakhsiyaadka Laanta Socdaalka Maraykanka ka haysta ee ku jooga Amarka laanta (Immigration and Naturalization Service - INS) mudo gaadhaysa sanad, shakhsiyaadka shuruudaha ku soo galay iyo dadka gaar ee dhibaatada farar xumaynta reerku soo gaadho.

**Sharcigu miyuu badalayaa qawaaniinta dadka soo haajiray ee imikaba uqalma?**

- Maya.  Dhamaan dadkii hore ugu qalmay, way usii soconaysaa.

**Sharcigu miyuu u kordhinayaa mudada dadka aan mu'aadiniin ahayn wadanka ku jooga sababo laxidhiidha aromo xuquuqul iisaana?**

- Haa. Marka la eego natiijada sharciga 2002,  ma jirayso, mudadii todobada sano ahayd ee ay uu ku koobaana lacagta danyartu, ee laxidhiidhay qaxootiga, magan galyada, dadka Amarayshiyaanka, iyo dadka ka soo galay Kuyuuba iyo Hayti. Laga bilaabo Abriil 1deeda, 2003 dadkan aan mu'aadiniinta ahayni, way uqalmayaa, waa hadii ay buuxiyaan shuruudaha barnaamijka kuwaasi oo loo xisaabiyo dakhliga  soo gala iyo wixii kale ee kuu adeega.

**Ma barnaamijka Lacagta Danyarta ayaa go'aan ka gaadhaya inaan la'xaad laa'ay?**

- Maya.  Waa inaad marka hore ka heshaa kaalmo faa'idooyin barnaamijyada ay ka mid yihiin, Caafimaadka Daryeelka Danyarta, maadaamo aad indho laada'ay ama aad la'xaad' laa'da' ay.

**Miyaan heli karaa Faa'idooyinka caruurtayda mu'aadiniinta ah xitaaa hadii aanan ahayn qof soo haajiray oo uqlama?**

- Haa. Lagaagama baahna inaad keentid waraaqo adiga ah marka aad caruurtaada udalbanaysid ama qof kale oo uqalma oo qoyska ka tirsan. Waxase jirta, waa inaad keentaa cadayn tilmaamaysa inta kharash ku soo gasha, iyo adeegyada kale ee aad isticmaashid, si uu howl wadeenku ugaado lacagta danyarta ee uu siin karo.

**Hadii aan helo lacagta dayarta waxyeelo miyey ugaysanaysaa hadii aan doono inaan mu'aadin noqdo?**

- Maya. Lacagta danyarta ood qaadatay qofka soo haajiray ka dhigi mayso "xil dawlada saaran" taasi micnaheedu waxa weeyi qofka usoo haajiray Maraykanka la mastaafurin mayo, ama loo diidi mayo inuu wadanka soo galo, looma diidayo inuu helo deganaasho rasmiya ama "Giriin Kaadh"maado wuxuu qaatay lacagtii danyarta.

**Sidee baan udalban karaa ama macluumaad dheerada uheli karaaa?**

- Si aad uheshid lacagta danyarta, waa inaad dalab ka xaraysaa xafiiska meesha aad degan tahay ee qaabilsan lacagta danyarta, kaasi uu inta badan kuyaala xafiiska Danyarta Welfare office.
- Si aad uheshid macluumaad dheeraad, fadlan la hadal xafiiska lacagta danyarta  meeshaad degan tahay kaasi oo kuyaala telefanka qaybta (blue pages) adiga oo eegaya qaybaha "social services department" (Laanta Adeega Bulshada) ama "welfare department" (Laanta Danyarta ) ama waxaad la hadashaa Telefanka Gobolada oo dhan ee bilaashaka ah-**1-800-221-5689**.
- Dadka Af-Soomaali ku hadala ayaa kuu diyaara inay telefankaasi kaa qabtaan.

***Xaashida Udhiganta Lacagta ee Danyartu waxay xoojisaa Maraykanka.***

*Wasaarada Beeraha ee Maraykanku (United States Department of Agriculture - USDA) waa Wasaarad ku dhaqanta sinaanta iyo in si siman fursad loo siiyo dadka shaqo ka doonta.*